Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Baaritaanka Dhiigga ee Bukaanada Qaadanaya Daaweynta Kiimikada ama Shucaaca

## Blood Counts for Patients Receiving Chemotherapy or Radiation Therapy (Somali)

Baaritaanka Unugyada Dhiigga ee Dhammeyska tiran (CBC) waa baaritaan dhiig oo loo qaado si dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka looga caawiyo wax badan ka ogaadaan xaaladooda. Wuxu muujiya tirada unuga dhiiga cad, unuga dhiigga cas, iyo saxanyarooyinka ah ee ku jira dhiigooda. Haddii ilmahaagu qaadanayo daaweynta kiimikada am shucaaca ee kansarka, waxa loo baahan yahay in dhiigooda si joogto ah loola socdo si loo ogaado sida daaweyntu u saameynayso unugyadooda dhiiga. Dhakhtarkaaga kansarka iyo/ama shucaaca ee aasaasiga ah ayaa kuu sheegi doona inta jeer ee shaybaarku eegi doono.


CBC waxa lagu ogaadaa in muunad dhiig ah laga qaado ilmahaaga. Dhiiga waxa lagu soo qaada in cibrad xididka laga soo nuugo, farta la duro, ama tuubada ku xiran cunaha ilmaha haddii ilmahaagu mid qabo oo la isticmaali karo.

### Dhiigga

Dhiigu wuxu cuntada iyo ogasjiinta gaarsiiya dhammaan qaybaha jirka.

### Dhuuxa lafta

Unugyada dhiigga cas, unugyada dhiigga cad, iyo saxanyarooyinka waxa lagu soo sameeyaa nudda isbuunyada ah ee jilicsan ee lafahaaga, oo loogu yeero dhuuxa lafta (Sawirka 1). Markaad qaadaneyso daaweynta kiimikada ama shucaaca, kooxdaaadu waxay si dhow ula socon doonaan unugyada dhiiga cas, unugyada dhiigga cad iyo saxanyarooyinka.




**Picture 1** Dhuuxaha lafuhu waa halka unugyada dhiigga lagu soo sameeyo.


©1990, Waxaa dib loo eegay 2023, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

Daaweynta kiimikada iyo shucaaca ee lagula tacaalo kanasarku waxay dhaawici karaan dhuuxa lafta iyo unugyada ku guda jira.


- Carruurta ka yar da'da 1 sano, unugyada dhiigga waxa lagu sameeyaa dhuuxa dhammaan lafaha.
- Qof kasta oo ka weyn da'da 1 sano, unugyada dhiigga waxa lagu sameeyaa dhuuxa lafaha ee lafaha miskaha, lafta xabbadka/shafka, feeraha, iyo laf-dhabarta.

**Unugyada dhiigga ee cad (leukocytes):**

- Waxa looga baahan yahay la dagaalanka cabuuqa.
- Way korhdi karaan marka loo baahdo in lagula dagaalamo caabuq.
- Tiradooda caadiga ah ee carruurtu waa inta u dhexaysa 4,000 iyo 10,000.
- Hoos bay u dhici karaan marka la qaadanayo daaweynta kiimikada ama shucaaca, oo aad bay intaas uga hooseyn karaan, khaasatan 7 illaa 10 beri ka dib marka daaweynta kiimikada badankoodu bilaabantay.

**Unugyada dhiiga cas (Sawirka 2):**

- Heemogaloobintu waxay hawada ogsajiinta ee aynu neefsano u qaadda dhammaan qaybaha jirka.
  - Heerka heemogaloobinta ee ilmuhu caadiyan waa 12 illaa 14.
  - Hoos bay u dhici karaan marka la helayo daaweynta kiimikada ama shucaaca, oo aad bay intaas uga hooseyn karaan, khaasatan 7 illaa 10 beri ka dib marka daaweynta kiimikada badankoodu bilaabantay.




**Sawirka 2** Sida unugyada dhiiga ee cad, unugyada dhiigga ee cas, iyo saxanyarooyinku u eeg yihiin marka lagu fiirsho maykariskoob.

**Saxanyarooyin:**

- Waxay xinjiraha dhiigaaga ka caawiyaan joojinta dhiig-baxa.
- Tiradooda caadiga ah ee carruurtu waa 140,000.
- Hoos bay u dhici karaan marka la qaadanayo daaweynta kiimikada ama shucaaca, oo aad bay intaas uga hooseyn karaan, khaasatan 7 illaa 10 beri ka dib marka daaweynta kiimikada badankoodu bilaabantay.

## Calaamaddaha iyo astaamaha

### Unugyada dhiigga oo hooseeya

Waxa jira astaamo iyo calaamado kala duwan oo ay tahay in la fiirsho marka ilmahaagu qaadanayo daaweynta kiimikada ama shucaaca. **Wac Xarunta Hematology haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah calaamadahan:**

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Caabuqa** | • Qarqaryo<br>• Finan<br>• Dhuun xanuun<br>• Shuban<br>• Qoor adeyg<br>• Dareere dhegaha ka yimaadda | • Qandho 100.4° Fahrenheit (F) ama 38° Celsius (C) ah ama kasii sareeysa.<br>• Qufac muddo dheer soconaya<br>• Kaadida oo gubta<br>• Dareere ka yimaadda tuubada qoorta la geliyo | • U baylah noqoshada cudurada la kala qaado sida jadeecada, busbuska, hargabka ama karoonaha<br>• Meel kasta oo jirka ka mid ah oo leh kuleyl, guduudasho, ama xanuun |
| **Dhiig yari (dhiig la'aan)** | • Midab barax ah<br>• Wareer<br>• Xanaaqi-ogaan | • Tabar daro<br>• Daal<br>• Caajis | • Dhaxan dareemis<br>• Neefsashada oo yaraata |
| **Tirada saxanyarooyinka oo hooseysa (xinjiroow la'aan)** | • Dhiig-baxa maqaarka hoostiisa<br>• Nosebleeds<br>• Kaadi casuusi ah ama cas<br>• Nabaro casuusi ah oo maqaarka hoostiisa ah | • Madax xanuun<br>• Dhibaato dhanka soo toosidda ah<br>• Saxaro casaan dhalaalaya ama casuusi ah | • Hunqaaco (matag) u eeg bun la ridqay ama kafee<br>• Dhiig ka imanaya afka ama cirriddada |

## Daaweynta

Daaweyntu waxay ku xiran tahay astaamaha iyo calaamaddaha ilmahaagu muujinayo.

| | |
|---|---|
| **Caabuqa** | • Sheybaar dhiig ama kaadi ah • Raajo laabta ama sanka ah<br>• Daawo qallajiye ah oo Isbitaalka lagaga qaato IV-ga |
| **Heemagaloobiin hoose** | • Dhiig cas (RBC) oo bukaanka loogaga shubo xididka IV muddo 2 illaa 4 saacadood ah. Tan waxa loo sameeyaa in lagu kordhiyo tirada RBC inta dhuuxa laftu sameynayo unugyo cusub. |
| **Tirada saxanyarooyinka oo hooseysa** | • Dhiiga nooca saxanyarooyinka oo bukaanka laga siiyo IV-ga muddo 1 saac ah. Tan waxa la sameeyaa haddii tirada unugyada saxanyarooyinku aad u hooseeyaan ama haddii uu jiro dhiig bax aan joogsanayn. Ku shubista saxanyarooyinku waxay hoos u dhigtaa dhiigbaxa illaa inta dhuuxa laftu sameynayo saxanyarooyin ku filan |

## Ka hortaga

Hoos waxa ku qoran qaar ka mid ah waxyaabaha aad sameyn karto si aad u ilaaliso caafimaadka iyo baqabka ilmahaaga qaadanay daaweynta kiimikada ama shucaaca ee lagula tacaalo kansarka.

- Hubi in ilmahaaga iyo qof kasta oo qoyska ka tirsan farahooda si fiican u dhaqaan. Had iyo jeer gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo diirran ka dib marka la isticmaalo musqusha, ka hor cuntada, iyo ka dib marka la taabto xayawaanada.
- Ka fogow oo ha u dhowaan dadka jirran.
- Ha u ogolaan ilmahaaga inuu qoto carrada ama dhoobo.
- Weydii kooxda daaweynta kansarka ee idinla shaqeynaysa sida ilmahaagu uga qayb qaadan karo xanaaneynta xayawaanada rabbaayadda ah iyo waxyaabaha laga ilaalinayo.
- Ilmahaagu waa inaanu nadiifin sanduuqyada xayawaanadu ku saxooraadan, ka shaqeyn xeryaha, aanu taaban ama xanaaneyn shimbiro, cawska jarin, raacin cagafcagaf ama aanu beer falis sameyn. Ka ilaali goobaha dhaska leh.
- Ka ilaali in ilmahaagu ku dabbaasho jidhaamaha, webiyada, harooyinka ama badaha. Ha u ogolaan inay u dhowaadaan biyaha taagan (fadhiya).
- Ka taxaddar badqabka cuntada ceerin ama aan karsaneyn iyo cabbitaanada.

- Waxa jiri kara xilliyo ka mid ah daaweyntaada oo kooxdaada kansarku idinkula taliso inaad iska deysaan:
  - Dugsiga
  - Ciyaaraha khatarta sare leh ee la istaabto
  - Goobaha lagu buuqo
  - Hawlaha kale ee kordhin kara khatarta aad adiga/ilmahaagu ku qaadi karo xanuun ama caabuq

## Markay tahay in la waco Dhakhtar

Wac dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka haddii:

- Markaad u maleynayso in ilmuhu caabuq qabo.
- Ay ka ag dhawaadeen qof qaba fayraska jadeecada ama busbuska.
- Uu ku dhacay jarriin ama xagtin aad u dhiig baxaysa. Cadaadi aagga dhiig baxaya oo u isticmaal faashad qallalan muddo 15 daqiiqo ah.

## Goorma ayay tahay in la waco 911

U soo wac 911 wixii caawin degdeg ah haddii canugaaga:

- Aanu neefsan karin.
- Dhaawac weyni soo gaaray.
- Uu leeyahay dhiigbax badan oo aan istaagayn.